

## FILANWAA Q5AAD W/Q: Yaasiin Xasan Muuse



**FILANWAA Q5AAD** Canab waxaa u yeedhay hooyadeed waxayna ku tidhi: ?Naa dhaqso oo wiilka macasalaame gabadhii cilaanka kuu saari lahayd ayaa ilaa maantoo dhan kuu xiyaran?. Canab ayaa tiri: Haye hooyo fadlan waxyar I suga ilaa shan daqiiqo ayay codsatay. Sheekadi ayuu Maxamed halkii ka sii waday, wuxuu ku yiri: ?Walaalo waan dareemaya arosku wuu howl badanyahay, adna mashquul ayaad tahay dabcan oo waan ujeeda, balse waxaad ogaataa maanta aragtidaada aad ayaan ugu farxsanahay, inshaa'alaah arooskan keena ayaa xigi doona, mida kale xafladda aroska waan iman doona, garab kaaga ayaan taaganahay mar walba iyo meel kasta, gacaliso aad yaan kuu jecelahay, waxaan rajaynayaa in ilaahay riyadeena inoo rumeeyo maalin dhow?. Waad mahadsantahay ayay si hoose u tiri Canab iyadoo ilmaynaysa. Canab imtixaan adduun ayaa ku habsaday, qaab ay Maxamed wax ugu sheegtona way garanweyday, aad ayay ugu adkaatay inay afkeeda ka dhahdo, nin ayaa la I siiyay oo qofka la aroosayo waa aniga!. Intaa ka dib, islaan Eeddo u ah iyo gabadh ay walaalo yihiin oo suuqa Bacadlaha ku maqnaa, oo u doonay dharkii aroska ayaa guriga yimid, iyadoo aana nasan, durba waxay dhaheen aaway Canab, bal dharka aan usoo gadnay ha isku eegtee, waxaa lagu yiri qolka ayay ku jirta oo wiil ay iskuulka wada dhigtaan oo Maxamed la yiraahdo ayaa la joogaa. Canab walaasheed oo wax ka ogayd inuu xidhiidh hoose ka dhaxeeyo labadan qof, ayaa la soo booday hadal dheer iyadoole, ?Alla hooyo waa wiilkii ay is jeclaayeen?. Alla allaa jacaylkaa ba' oo miyuuna ogayn in naagta la qabo! War gabadha iigu yeedha wakhtiga ayaa nagu yar, waxaan doonaya inaan aado xaafadda Kooshin ayay tiri islaantii Canab hooyadeed ahayd, waxayna raacisay dhawaaq oo ay leedahay naayaa Canabeey naa soo bax. Canab, haye hooyo, waa i kan waan soo socdaa ayay dhahday, ka dibna waxay ku tiri Maxamed: ?Walaalo waad maqlaysaa hooyo ayaa ii wacaysa, dabcan waxaan rabay inaan kuu sheego arrin muhiima, balse hadda wakhtiga oo inagu cidhiidhiya awgeed, caawa ayaan warqad kuu soo qori doona, waxaana kuugu soo dhiibi saaxiibtay falastiin, kolay waxyaabo badan ayaa iska jira, haddana macasalaama ina keen aan ku sii dhaweeye?, sidaasa ayay hadalkii ku soo gabagaysay. Maxamed, wuxuu yiri: ?Waayahay gacaliso, waad mahadsantahay, inkastoon jeclaa inaad isheegto waxa jira, haddana waan dareemaya inaad wakhti hayn, balse dhib male warqada iigu soo qor, imikana macasalaama iyo kulan dambe oo xiiso leh?. Maxamed intii uu waddada sii socday, qalbigiisa waxyaabo badan ayaa ku soo dhacay, isagoo yaaban, si gaara wuxuu isku waydiiyay tallow maxaa jira? Waa maxay arrinta ay warqada kuugu soo qorayso ee soo koradhay iyo maxay hadda kuugu sheegi wayday yaab?! Canab aragtida Maxamed iyo kulankii galabta, cishqi horle ayuu kusii abuuray, iyadoo awalba ogayd in uu Maxamed si wayn ujecel yahay, haddana hadaladii naxariista iyo kalgacaylku ku dheehnaa ayaa maankeeda ku yeeshay saamayn baaxad wayne leh. Waxaa mahadho ku noqotay sida uu Maxamed ugu hanwayn yahay in uu nolasha la wadaago, isla markaana ballantii ay mar hore wada galeen dhankiisa ilaa hadda uga tahay diyaar iyo ogaal la'aanta inay Canab tahay qof la qabo oo marwo ah. Laba kala bariday kala warla! Beri galinka danbe ayaa loo balansanyahay inay xafladda arosku dhacdo, wax walba waa la diyaariyay. Canab waxay gashay mashquul, sidaasi awgeed firaqo ay warqad ku qorto mayna helin, saacadba saacada ka dambaysa kansho xumo iyo tabaabusho aros ayaa la sii guda galayaa, Maxamed-na wuxuu naawilayaa farriintii uu ka sugaayey Canab, oo gurigooda agtisa ayuu fadhiistay si ayna qofka warqada sida isu waayin. Xili dambe ammin la joogo ayay Canab cilaankii iska maydhay, dadka guriga jooga qaar ayaa mar hore seexday, kuwana hadda ayay isku diyaarinayaan, balse Canab jiif uma yaalo sababtoo ah waxay niyadeedu ku howlantahay warqadda laga sugaayo. Gabadh ay walaalo yihiin ayaa casho fudud ukeentay, waxayna ku tiri: ?walaalo wax cun, ilaa maanta sidii

qof sooman ayaad qatanayd, Canab waxay ugu jawaabtay, ?Cunto ma cuni karo oo niyad iyo hammuun ah u mahayo walaalo, xaaladaydu ma wanaagsano, wax badan ayaa iga si ah, waxaan isaga shaki qabaa inaan xanuunsanayo?. kadib gogoshi ayay is tiri iskukala bixi Canab waa qof daal iyo murugo isu raaceene durba way gamaday, saacad ka dib ayay soo booday, mise waa habeen badh, naxdin iyo yaab, warqad iyo qalin ayay kala soo baxday Boorso buuggaagta ay ku ridan jirtay, markaasay qoraal ku dhaqaaqday. W/Q Yaasiin Xasan Muuse [Yaasiinxm114@gmail.com](mailto:Yaasiinxm114@gmail.com)